

Kiraysteyaasha

Dhowrista
dabaajigaaga

**Ilaalinta Dabaajiga
Kiraysiga**
laga bilaabo 6da Abriil 2007da

Waa maxay Ilaalinta Dabaajiga Kiraysigu?

Su'aalahaaga ayaa halkan lagaga jawaabayaa...

Miyaad heshiis kiraysi oo cusub la gelayaa hantiile khaas ah ama wakiil maalinta 6da Abriil 2007da ama ka dib?

Laga bilaabo 6da Abriil 2007da, marka aad dabaaji bixiso, waa in hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaagu uu kaas ilaaliyo isagoo isticmaalaya qorshe dabaaji kiraysi oo ay dawladdu rukhsaysay.

Hubi in aad taas wax ka weydiiso hantiilaha gurigaaga.

Waxay Dawladdu rabtaa in ay hubiso in la ilaaliyo dabaajiga aad u bixiso kiraysiga gurigaaga si markaas:

- Laguugu soo celiyo gebi ahaan ama qayb ahaan dabaajigaaga, marka aad xaq u yeelato
- Ay u sii fududaato xallinta murannada idin dhex mara adiga iyo hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga

Gelitaanka guriga

Bilowga heshiiska kiraysiga ee cusub, dabaajigaaga sidii caadiga ahayd u sii hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga. Waxaa hantiilaha ama wakiilka looga baahan yahay in uu 14 maalmood gudahood kugu siiyo faahfaahin ku saabsan sida dabaajigaaga loo ilaalinayo oo uu kuu sheego:

- Macluumaadka xiriirka ee qorshaha dabaajiga kiraysiga
- Macluumaadka xiriirka ee hantiilaha ama wakiilka
- Sida loo codsado soo saarista dabaajiga
- Warbixin sharxaysa ujeeddada dabaajiga
- Waxa la samayn karo haddii dabaajiga la isku qabsado oo uu muran ka yimaaddo

Haddii aad warbixintan oo dhan heli weydo, hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga weydii su'aasha fudud ee ah –**'sidee ayaa loo ilaalinayaa dabaajigaaga?'**

Daryeelka dabaajigaaga

Waxaa kugu waajib ah in aad guriga ku soo celiso sidii uu ahaa markii lagaa kireeyey, marka laga reebo khasaaraha fudud ee caadiga ah ee gaadha.

Sidaas darteed marka aad saxiixayso heshiiskaaga kiraysiga, waxaa fiican in aad:

- Liis faahfaahsan ka haysato waxa ku jira (saabaanka iyo qalabka)
- Diiwaangeliso xaaladda gurigu ku sugan yahay iyo waxa yaalla (sawirro in aad ka qaaddo ayaa fiican)
- Baarto duruufka keeni karta in hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaagu uu kaaga murmo dabaajigaaga

Sidee ayaa loo adeegsanayaa?

Kan ayaa ah hagayaga tartiib-tartiibta ah ee fudud...

Waa kuwee ururrada qorshooyinka wada?

Saddexda Qorshooyin ee Dabaajiga Kiraysigu waxay kala yihiin:

Tenancy Deposit Solutions Ltd (Xalalka Dabaajiga Kiraysiga)

www.mydeposits.co.uk
info@mydeposits.co.uk

The Tenancy Deposit Scheme (Qorshaha Dabaajiga Kiraysiga)

www.tds.gb.com
0845 226 7837

The Deposit Protection Service (Adeegga Ilaalinta Dabaajiga)

www.depositprotection.com
0870 707 1 707

Hantiilaha gurigaaga weydii qorshaha ilaalinaya dabaajigaaga.

Waxa haboon in aad samayso haddii hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaagu uusan ilaalin dabaajigaaga?

Waxaad ka codsan kartaa maxkamadda degmada ee xaafaddaada. Waxay maxkamaddu hantiilaha ama wakiilka ku amri kartaa in uu ama kuu celiyo dabaajiga ama kaas ku ilaaliyo qorshe. Haddii hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaagu uusan ilaalin dabaajigaaga, waxaa lagu amri doonaa in uu adiga kuu soo celiyo caddadka dabaajiga saddex laabkiis.

Ka bixitaanka guriga

Dhammaadka kiraysiga, fiiri in aad guriga iyo waxa ku jira kaga tagayso sidii lagaaga kireeyey adiga – marka laga reebo khasaaraha fudud ee caadiga ah ee gaadha – hubina in aad bixisay kiradaada iyo wixii kalee kharash ah. Ka bacdina hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga kala heshii caddadka dabaajiga ee haboon in adiga lagu soo celiyo.

Muddo 10 maalmood ah gudaheed – waa in aad ku hesho caddadka lagu heshiiyey ee dabaajiga.

Xallinta murannada

Marka aad guriga ka baxdo, haddii adiga iyo hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaagu aad ku heshiin kari weydaan caddadka dabaajigaaga ee haboon in lagu soo celiyo, waxa jiri doona adeeg bilaash ah oo uu ku deeqo qorshaha ilaalinaya dabaajigaaga kaasoo gacan ka geysan doona xallinta murankiina. Wixii faahfaahin ah ka fiiri warbixinta aad ka heshay hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga bilowgii kiraysiga gurigaaga.

Hantiilahaagu kuma ogaysiin karo in uu guriga la noqonayo dhammaadka kiraysiga ka hor inta uusan ilaalin dabaajigaaga kuuna sheegin sida loo ilaalinayo.

Ma rabtaa
war dheeraad ah?



Si aad talobixin u hesho booqo:

www.direct.gov.uk/tenancydeposit
ama soo wac khadka buugyaraha ee
0845 609 0696

Haddii kale la xiriiir ururrada soo socda:

Shelter (Hoy)

Khadka caawinta ee talobixinta ku
saabsan guryeynta ee BILAASHKA AH*
0808 800 4444

(furan 8da subaxnimo ilaa 12ka habeenimo 7 maalmood
toddobaadkii)

www.shelter.org.uk/advice

* marka la soo wacayo lambarkan waxaa laga yaabaa in
lacag laga bixiyo lambarrada telefoonka gacanta qaarkood

Citizens Advice (Talosiinta Muwaadiniinta)

Ku jira buugga telefoonnada iyo

www.adviceguide.org.uk

National Union of Students (Ururka Qaran ee Ardayda)

www.nusonline.co.uk/info/housing

Booqo xaruntaada talosiinta ardayda ama
ururka ardayda si aad warbixin dheeraad
ah u hesho.

Published by the Department for Communities and Local Government.

©Crown copyright 2007.

Printed on paper comprising no less than 75% post-consumer waste.

Product Code: 06HMD04101/TSOM